

## Ka-tanaasulidda Ilaalinta Bulshada

### Guudmarka

Ka-tanaasulidda Ilaalinta Bulshada (Community Protection) waa mid ka mid ah shanta ka-tanaasulid ee Adeegyada Guriga iyo Bulshada Ku-Saleysan ee federaalka ee Maamulka Naafonimada Koritaanka ee DSHS. Waxay bixisaa taageerooyin degaan oo loogu talagalay shakhsiyadka ay da'doodu ugu yaraan tahay 18 sano jir kana soo baxa shuruudaha DDA iyo Barnaamijka Ilaalinta Bulshada.

Shakhsiyadka ayaa la qiimeeyay in ay u baahan yihiin kormeerka shaqaalaha goobta, oo 24-saac ah si loo hubiyo bedqabka naftooda iyo tan dadka kale. Shakhsiga waa in uu oggolaadaa Qorshaha Taageerada Shakhsiga ee Ilaalinta Bulshada. Shakhsiga wuxuu codsan karaa in lagu qoro ka-tanaasulidda ama in lagu qoro ka-tanaasulid kale waqtii kasta. Isqoritaanka wuxuu ku saleysan yahay awoodsiinta.

### Adeegyada Waxaa Ka Mid ah

- Tiknoolajiyadda Dadka Caawisa.
- Kala-guurka Bulshada.
- La-qabsiga Deegaanka.
- Dabar-goynta Dhilqaha.
- Shaqada ay Taageeraan Koox ama Shakhsii.
- Caawimaadda Farsamo ee Gaarka ah.
- Daaweynta Jirka, Hadalka, iyo Shaqada (ee loogu talagalay dadka waaweyn, marka aan loo caymin si waafaqsan dheefaha qorshaha gobolka).
- Baxnaaninta Degaanka ah.
- Qiimeyn Halista.
- Kalkaalinta Xirfadeed (ka weyn da'da 21).
- Sahayda iyo Qalab Gaarka ah.
- Wadatashi iyo Qiimeyn Gaar ah.
- Adeegyada Xasillinta-Baxnaaninta Gaarka ah.
- Adeegyada Xasillinta-La-talinta Qoyska iyo Shaqaalaha.
- Adeegyada Xasillinta-Sariirta Shido Weecinta.
- La-talinta Qoyska iyo Shaqaalaha.
- Gaadiid.



### Xaq-u-yeelashada

Macaamiisha DDA ee:

- Ka soo baxa shuruudaha Naafonimada Damaannada Bulshada.
- Ka soo baxa shuruudaha Daryeelka Heerka Hay'adeed.
- Ka soo baxa jaangooyooyinka dakhliga iyo kheyraadka Apple Health ee Washington. (Dakhliga iyo kheyraadyada macmiilka).
- Ah muwaadin Mareykan ah ama deggane federaal ahaan sharci ah oo xaq u leh.
- Haysta Qorshaha Adeegga Qofka Xuddunta u ah iyo Qiimeynata ee DDA kaas oo sharxa sida baahiyada baxnaaninta, bedqabka iyo caafimaadka ka-qaybgalaha looga haqabtiri karo bulshada.
- U aqbala adeegyada guriga iyo bulshada-kusaleysan sida beddelka adeegyada aan kuwa xirfadlayaasha ahayn.
- Ka-qaybgalayaasha Ilaalinta Bulshada waa in ay sidoo kale ka soo baxaan shuruudaha Barnaamijka Ilaalinta Bulshada ee [WAC 388-831-0030](#).

(lagu sii wado bogga soo socda)

Xiriirka: Ann Vasilev, Maamulaha Adeegyada Ka-tanaasulidda • [Ann.Vasilev@dshs.wa.gov](mailto:Ann.Vasilev@dshs.wa.gov) • 360-407-1500  
Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah booqo: <https://www.dshs.wa.gov/dda/>

**Waaxda Adeegyada Caafimaadka iyo Bulshada ee Gobolka Washington**

DSHS 22-1959 SM (12/23) Somali

## Qiimayaasha

Adeegyada ka-tanaasulidda ayaa waxaa bixiya adeeg bixiyeyaa kala duwan oo badan oo qandaraas la siiyay kuwaas oo qiimayaashooda ku xiran adeegga la bixiyay. Qiimayaasha adeegga waxaa laga heli karaa: <https://www.dshs.wa.gov/altsa/management-services-division/office-rates-management>.

## Miisaaniyad

Awoodda qaadka ka-tanaasulidda Ilaalinta Bulshada (Community Protection) waa ilaa 433 shakhsii. Sannad maaliyadeedkii FY23 ee gobolka, 391 macmiil ayaa loogu adeegay ka-tanaasulidda Ilaalinta Bulshada (Community Protection) oo kharashkooda celcelis ahaan ahaa \$21,798 bil kasta.

Ka-tanaasulidda waxay ku xaddidan tahay kharashka celceliska ah ee Xarumaha Daryeelka Dhexe ee loogu talagalay Shaksxiyaadka qaba Naafonimada Caqliga ee iskujir kastoo ah adeegyada lagama maarmaanka u ah baahiyda macmiilka la qimeeyay. Dadka ka tanaasulka ku jira adeegyo uma diidi karto iyadoo sababtu tahay maaliyad la'aan, haddaba kharashaadka ka-tanaasulidda ayaa si taxaddar leh loola socdaa.

## Kormeerka

### Dibedda

- Qaybta Adeegyada Daryeelka Degaanka ee DSHS.
- Xarumaha Adeegyada Medicare iyo Medicaid.
- Mashruuca Tilmaamayaasha Muhiimka ah ee Qaranka.
- Xafiiska Hantidhowraha Gobolka Washington.
- Waaxda Caafimaadka Gobolka Washington.

### Gudaha

- Xafiiska DDA ee Barnaamijka iyo Horumarinta Siyaasadda.
- Xafiiska DDA ee Tayada, U-hoggaansamidda iyo Tababbarka.
- Xafiiska DDA ee U-hoggaansamidda Adeeg-bixiyaha iyo Tayo Hubinta Killiga Kala-guurka.



## Awoodda

- Maaliyadda federaalka ee waafaqsan qaybta 1915(c) ee Xeerka Damaannada Bulshada, Ka-tanaasulidda Adeegyada Guriga iyo Bulshada Ku-Saleysan iyo maaliyadda gobolka.
- [Cutubka 71A RCW](#), Naafonimada Koritaanka.
- [Cutubka 388-845 WAC](#), Ka-tanaasulidda Adeegyada Guriga iyo Bulshada Ku-Saleysan ee DDA.